

Jannaayo 26, 2017

SOMALI

Qoysaska Dugsiyada Dadweynaha Boston ee Qaaliga Ah:

Waxaanu ku faraxsanay inaan kula socodsiiino in dugsiya ilmahaagu uu kamid yahay kuwa sannad dugsiyeedka danbe ka qeybqaadanaya Wakhtiga Barashada ee La Dheereeyay (ELT). Wakhtigan dheeraadka ahi wuxuu kumaananan arday oo kale oo dhigata guud ahaan Dugsiyada Dadweynaha Boston u saamixi doontaa inay ka qeybqaataan waxbarasho iyo fursado kobcineed oo tayo leh — laga bilaabo waxbarasho la shakhsiyeeyay iyo fasalada luqada oo tayo sare leh ilaa barnaamijyada fanka, waxbarashada jirka iyo naadiyada ardayda – waxaanay naga caawin doontaa yareynta nusqaamaha fursadaha iyo guul gaarida.

Dhawrkii sanno ee lasoo dhaafay, waxaan sameynay horumar mug leh oo ku aadan dheereysiinta maalinta dugsiya ee ardaydeena. Ma aanaan awoodneen inaan sameyno tan annagoon heshiis muhiim ah la lahayn macalimiinteena heeganka ah. Waxaan immika qarka u saaranahay inaan si buuxda u sameyno ballan qaadkayaga ELT ee waafajinta Boston celceliska dhererka maalinta dugsiya ee dhamaan wadanka. Annagoo taageero ka helnay Duqa magaalada Walsh, waxaan carruurteena maalgashanaynaa \$14 milyan oo dheeraad ah taas oo 15,000 arday oo kale oo dhigta 39 dugsi dayrta danbe siin doonta waxbarasho iyo kobcin qiimo leh. Guud ahaan, BPS waxay wakhti barasho oo la dheereeyay ka hirgelin doontaa 57 dugsi oo u adeega 23,000 arday oo ku eeg saddex sanno.

Cilmi baaris ayaa muujisay inay jirto xiriir fiican oo ka dhaxeeya maalinta dugsiya la dheereeyay iyo koritaanka adag ee ardayga. Daraasadaha qaranku waxay muujiyeen in wakhtiga barashada dheeraadka ahi uu ardayda ka caawiyo inay kor u qaadaan guulaha waxbarasho.

Faa'idooyinka ay ardaydeenu ka heli doonaan ELT waxa kamid ah:

- ✓ Wakhti barasho oo dheeraad iyo fursado kobcineed oo la kordhiyay
- ✓ Wakhti dheeraad ah oo farogelinta koox yar ah si wax looga qabto baahiya waxbarasho ee ardayga shakhsiga ah.
- ✓ Wakhti dheeraad oo ay macalimiintu kula shaqeyaan oo ay u horumariyaan tayada waxbarashada

Annaago isku diyaarinayna hirgelinta ELT, waxaan sahaminay codsiyada ka yimid bulshooyinka dugsiya si aan isugu hagaajino wakhtiyada ay bilaabanayaan. Si kastaba ha ahaatee, iyadoo ay sabab u tahay adkaanshaha iyo isku xidhaan la'aanta nidaamka basaska dugsiyadeena, iyo si aan u gaarno himilooyinka hab cadaalad ah waxaan go'aansanay inaan dib u dhigno sameynta wixii isku hagaajin baaxad weyn ah wakhtiyada bilaabashada ee sannad dugsiyeedka danbe. Tani waxay noo ogolaan doontaa inaan sameyno falanqeyn si fiican looga fikiray, laga baaraan degay, oo dhameystiran taas oo ku aadan badelida wakhtiyada jalaska (dawanka) oo ay ku jiri doonto tallada bulshada oo aan ku dedaali doono gaarida natiiyooyinka siman. Waxa naga go'an inaan si wadajir ah u shaqeyno si aan ardaydeena ugu helno xalka saxda ah.

Sannad dugsiyeedka 2017-18, waxaan maalinta dugsiya ku dari doonaa 40 daqiiqo, taas oo kordhinaysa 6 saacadood iyo 40 daqiiqo; kuna daraysa wakhtiga waxbarashada in u dhiganta 20 maalin dugsiyeed oo dheeraad ah. Wakhtiga ay bilaabmayaan dugsiyada ELT waxay ahaan doonaan siday immika yihiin laakiin waxa isbadeli doona wakhtiyada dhamaadka. Wakhtiyada cusub waxay noqon doonaan sidan **7:30 a.m. ilaa 2:10 p.m.; 8:30 a.m. ilaa 3:10 p.m.; iyo, 9:30 a.m. ilaa 4:10 p.m.** Waxaan ku soo dhajinay taxanaha Su'aalaha Badanka La Isweydiyo (FAQ) www.bostonpublicschools.org/elt-faq si ay kuu siiso macluumaad dheeraad ah. Waad ku mahadsantay iskaashigaaga maadama aan korayn casriyeeyntan muhiimka ah ee wakhtiyada dugsiya.

Daacadnimo,



Tommy Chang, Ed.D.
Kormeeraha Guud

